

# Waxbarashada xirfadda waxay ardayda u diyaarinaysaa guul

Oktoobear 29, 2024 Weydiimaha Warbaahinta ([Media inquiries](#))

Dowladda Alberta ayaa ballaarinaysa barnaamijyada waxbarashada xirfadda si ay uga caawiso ardayda fasallada 10, 11, iyo 12 inay horumar u sameeyaan mustaqbalkooda.

Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay raacaan dariiqyo waxbarasho oo u diyaarinaya mustaqbalkooda waxbarashada jaamacadda, xirfadaha farsamada, iyo shaqooyin macno leh oo ku jira dhaqaalaha sii kordhaya ee Alberta. Si loo caawiyo dhallinyarada Alberta inay horumar u sameeyaan mustaqbalkooda, dowladda Alberta waxay sii wadaysaa horumarinta fursadaha waxbarashada xirfadda ee ardayda guud ahaan gobolka.

Iyadoo laga duulayo ballanqaadka dowladda Alberta ee taageeridda waxbarashada xirfadda ee nidaamka waxbarashada gobolka, dowladda ayaa ku bixinaysa ku dhawaad \$4.9 milyan doolar dee qo ah loogu talagalay barnaamijyada shahaadooyinka labalaabka ah si loo taageero 55 barnaamij oo cusub loona horumariyo 22 barnaamij oo hore u jiray oo loogu talagalay sannad dugsiyeedka 2024-25. Barnaamijyadani waxay u furan yihiin ardayda ku jirta 58 maamulka iskuulka oo ku yaal guud ahaan gobolka.

“Waxaa naga go’an inaan ardayda siino fursad kasta oo ay ku sahmin karaan dariiqyada xirfadeed inta ay waxbarashada ku jiraan. Maalgashigan cusub ee loogu talagalay barnaamijyada shahaadooyinka labalaabka ah wuxuu ka caawin doonaa ardayda inay helaan oo raacaan hamigooda, iyadoo sidoo kale loo diyaarinayo mustaqbalkooda iyaga oo helaya xirfado qiimo leh iyo dhibcaha jaamacadda.”

*Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada*

“Kaaliyeyaasha daryeelka caafimaadku waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta. Barnaamijka shahaadooyinka labalaabka ah ee kaaliyeyaasha daryeelka caafimaadka wuxuu siinayaa ardayda fursad qiimo leh oo ay ku bilaabaan

xirfaddooda caafimaad goor hore, isla markaana ku horumariyaan xirfadaha looga baahan yahay inay galaan oo xoojiyaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee gobolka.”

*Adrianna LaGrange, Wasiirka Caafimaadka*

Maalgelinta barnaamijka shahaadooyinka labalaabka ah waxay ardayda u horseedi doontaa inay raacaan waddooyin shaqo oo macno leh oo ku saabsan xirfadaha farsamada, shaqooyin macno lehna ka helaan beeraha, daryeelka caafimaadka, iyo kuwo kale oo badan. Ballaarinta barnaamijkan shahaadooyinka labalaabka ah waxay u suuragelin doontaa maamulka dugsiyada inay ka caawiyaan ardaydooda inay raacaan dariiqyo xirfadeed iyo fursado jaamacadeed oo la xiriira xiisaha iyo hamigooda.

“Waxaan uga mahadcelinaynaa dowladda Alberta ballanqaadkeeda ah ballaarinta barnaamijyada waxbarashada shahaadooyinka labalaabka ah ee dugsiyada Katooliga. Si wadajir ah, waxaan u qalabeyneynaa dhallinyaradeena agabyada ay u baahan yihiin si ay ugu kobcaan dhaqaale si degdeg ah isu beddelaya. Barnaamijka shahaadooyinka labalaabka ah wuxuu awood siinayaa ardayda dugsiya sare inay sahmiyaan oo ku dhisaan danahooda xirfadeed, iyaga oo ku hagaya dariiq ay ku gaaraan awooddooda buuxda.”

*Bryan Szumlas, Guddoomiyaha Guddiga, Dugsiyada Katooliga ee Degmada Calgary*

“Waxaan u mahadcelinaynaa deeqdan, taas oo noo ogolaanaysa inaan ballaarinno barnaamijyadeena shahaadooyinka labalaabka ah annaga oo soo bandhigeyna koorsada kaaliyaha daryeelka caafimaadka semester-ka soo socda. Barnaamijkan wuxuu siin doonaa arday badan fursad ay ku sahmiyaan dariiqyada daryeelka caafimaadka, ku helaan dhibcaha dugsiya sare iyo jaamacadda, iyo inay ku dhistaan xirfadaha loo baahan yahay si ay ugu guuleystaan shaqooyin muhiim u ah mustaqbalka Alberta.”

*Sandra Palazzo, Guddoomiyaha Guddiga, Dugsiyada Katooliga ee Edmonton*

Barnaamijyada shahaadooyinka labalaabka ah waxaa lagu fuliyaa iskaashi la leh dugsiyada jaamacadeed ama si waafaqsan waddooyinka waxbarashada xirfadeed waxaana laga heli karaa ardayda ku jira nidaamka dugsiyada guud, nidaamka gooniga ah, nidaamka Faransiiska, dugsiyada shatiyeysan, dadka asaliga ah, iyo dugsiyada madaxbannaan. Barnaamijyadani waxay bixiyaan koorsooyin ku saleysan xirfadaha oo loogu talagalay ardayda fasallada 10, 11, iyo 12 si ay u helaan labada dhibcood ee dugsiya sare iyo dhibcoodka ka gareeya shahaadada jaamacadda, diplomada, ama shihaadada.

## Xaqiiqooyin Degdeg ah

- Tan iyo 2019: \$18.6 milyan doolar ayaa loo asteeyey maamulka dugsiyada si ay u taageeraan barnaamijyada shahaadooyinka labalaabka ah.
- Maalgelinta Dugsiyada: Maamulka dugsiyada waxay helaan ilaa \$50,000 si ay u taageeraan kharashyada bilowga ah ee barnaamijyada shahaadooyinka labalaabka ah cusub, iyo ilaa \$100,000 si loo horumariyo barnaamijyada shahaadooyinka labalaabka ah ee hore u jiray.
- Maalgelinta Waxbarashada Alberta: Waxay bixineysaa \$4.3 milyan doolar oo ka mid ah maalgelinta barnaamijyada shahaadooyinka labalaabka ah sanadkan.
- Alberta Health: Waxay bixineysaa \$550,000 doolar si ay u taageeraan siddeed barnaamijyo shahaado labalaab ah oo kaaliyeyaasha daryeelka caafimaadka ah, kuwaas oo ka mid ah 77 barnaamij oo la maalgeliyay.
- Ka Qaybgalka Ardayda: Intii u dhaxeysay 2013 iyo 2023, ku dhawaad 83,000 arday oo dugsiya sare ah ayaa ka qayb qaatay ugu yaraan hal koorso oo shahaado labalaab ah.

## Xog la xiriirta

- Shahaado Labalaab - Maalgelinta Bilowga ah ee Maamulka Dugsiyada ([Dual credit – Start-up funding for school authorities](#))
- Shahaado Labalaab - Maalgelinta Horumarinta ee Maamulka Dugsiyada ([Dual credit – Enhancement funding for school authorities](#))
- Kooxda Talo-bixinta ee Dib-u-eegista Shahaadooyinka Labalaabka ah ([Dual Credit Review Advisory Group](#))

## Related news

- Siinta ardayda horumar ku bilaabasho suuqa shaqada ee Alberta ([Giving students a head start in Alberta’s job market](#) (June 5, 2024))
- Waxbarashada xirfadeed oo dheeri ah ardayda ([More career education for students](#) (April 9, 2024))

## Weydiimaha warbaahinta

### Kevin Lee

587-785-4366

Xoghayaha Warfaafinta, Waxbarashada Alberta